

WARBIXINTA BUKAAN SOCODKA

Ururinta tirada kaadida ee habeen iyo maalint oo lagu daray 15 ml Aashito (6 mol/L)

Asaaska

Si loo qiyaaso sii deynta maadoyinka jirka ee kaadida waxaa shuruud ah in la ururiyo **gebi ahaan** kaadida abuurmata muddo dhan habeen iyo maalin (24- saacaddood xilli dhan).

Isu diyaarinta

Quraaradda baadhid qaadidda waxaad ka soo qaadan rugta baadhid qaadidda, qaybta shaybaadhka ama rugta caafimaadka. Haddii aad oggtahay in kaadi ururintaadu ay ka badan tahay 2 litir habeenka iyo maalinta, codso in lagu siiyo labo quraaraddaha baadhidda.

OGEYSIIN! Quraaradda baadhidda waxaa ku jira ashito ama wax kale oo caafimaadka khatar u ah oo dhowraya in kaadidu ay isbedelin muhiimna u ah baadhidda. Sababtaa awgeed waa khasab in quraaradda lagu xafido meel carruurta gaari karin.

Quraaraddana waxaa ku qoran calaamadda digniinta.

OGEYSIIN! Toos ha ugu kaadin quraaradda baadhidda waayo waxaa khatar ah in ashitadda ku jirta ay ku soo gaadho dhaawacna kuu geysato.

Isticmaal meel la dhaqay oo aad loo nadiifiyey si aad ugu kaadido, maddaama uu raadka daawadda lagu dhaqay uu wax u dhimi karo baadhitaanka saxa ah. Waa in aad ka shubta weelka markiiba aad oo quraaradda baadhidda ku shubta mar walba oo aad kaadiso. Kuna dhan weelka biyo oo keliya.

Kaadi ururintu waa in ay ahaata 24 saacaddood oo sax ah.

Kaadida ugu subaxa ugu horeya waa aad daadin.

Halkaan ku qor saacaddu inta ay tahay:.....

Kaadida ka dambeysa saacadda kor ku qoran waxaa lagu arurin quraaradda baadhidda.

Ku xafid quraaradda baadhidda meel madow qabowna ah laakiin aan baraf ahayn.

Halkaan ku qor saacaddu inta ay tahay:.....

Hubso in magaca iyo tobbanka lambar ee caddeyntu ay sax ugu qoran yihiin quraaradda baadhidda iyo haddii uu qoraal codsi la socdo. Haddii aad ururin kari wayday kaadida habeen iyo maalin sida tilmaanta kor ku qoran, halkaan ku qor:

Miaay arurisay **gebi ahaan** kaadida muddo 24 saacaddood ah?

Haa

Maya Halkaan ku qor qaabka.....

.....